



Gaadiidka dugsiyada ee baabuurta

Warbixin ku socota mas' uulka daryeelka caruurta sanad dugsiyadeedka 16/17

Xarunta dalabaadka Östgötatrafiken ee Mjölby

Lambarka telefoonka:

Baajinta safarka ee

013 - 21 12 00 isniin-jimce saacadda 7.00 - 15.30

0771 – 71 10 20 maalmahoo dhan sc 6.00 - 23.00

Boostada elektarooniga: RBC-LKP@ostgotatrafiken.se

Fax: 0142 – 16 200

Markaad baajiso safarka adigoo isticmaalaya boostada elektarooniga sheeg magacaaga iyo lambarka shakhsiga aadi lahaa safarka iyo safarka laga hadlayo.

Ardayda ku baxaysa jadwal waqti waa iney sameysataa balanta 5 maalmood ka hor ayagoo wacaya

013 - 21 12 00 isniin-jimce saac 7.00 - 15.30

E-postadress: RBC-LKP@ostgotatrafiken.se

Adeegga macaamiisha ee Östgötatrafiken: 0771- 21 10 10 ama Bogga internetke ee Östgötatrafiken,isticmaal foomka ra'yi bixinta.

Mas' uulka gaadiidka dugsiyada ee xafiiska waxbarashada:

Lambarka telefoonka: 013-20 65 44 eller 013-26 37 48.

Hantida lunta waxaa lagu aruurinayaa oo lagu kaydinayaa qandaraaslaha.


Taxibil AB telefoonka 013-31 60 00.

Lambarka telefoonka ee gaadiidka Vikbolandet 011-160 00.

Dugsiyada ayaa wargelinaya waqtiyada ardaydu ay leeyihiin safarada dugsiyada.

Gaadiidka kaxaynta ardayda waxaa lala shaqeeyaa waqtiyada uu dugsiyada bilaabanayo iyo waqtiga uu dhammaanayo.

Waa mas' uuliyadda waalidka ama mas' uulka daryeelka inuu baajiyo safarka dugsiyada. Haddii ay dhacday waditaanka baska subaxdii oo ardaydu ay ilaawaan iney meesha la rabay ugu deggaan ,safarka soo laabashada galabtii waa la baajinayaa. Qofka mas' uulka ka ah ardayda ama waalidka ayaa qasab ah inuu ballansado safarka baska ee soo laabashada asagoo uu wacayo lambarka telefoonka 013-21 12 00.



Haddii ay soo noqnoqoto in la ilaawo ka deggida baska marka meesha loo socday la gaaro ayaa maamulka degmadu waxay ka qaadeysaa waalidka ama masuulka caruurta lacag dhan 150kr/markiiba la ilaawo ka degitaanka baska. Eeg warbixinta ku qoran buugga yar ee gaadiidka dugsiga, bogga 18. Haddii ardaydu, tusaale ahaan, ay hurdaan markaana la dhaafto meesha lagu degi lahaa, wax gaari kale ah ma u imaan doono. Haddii ardaydu xanuunsato maalintaa oo ay rabaan iney guriga aadaan macquul ma ahan in gaadiid kale la ballansado. Ardaydu masoo kaxeysan karaan asxaab inta safarka lagu jiro sababtuna waa in kuraasta gaadiidka oo dhan la wada iibsaday.

Qorshaha wadajirka:

- Subaxdii ayaa waxaa si wadajir ah u wada qorsheynaya ardayda dugsiga hoose iyo ardayda dugsiga xaaladaha gaarka ah.
- Ardayda dugsiga hoose waxay la sameynayaan galabtii qorshaha dhammaan ardayda oo dhan (xitaa ardayda ku socda gawaarida naafada).

- **Waqtiga leexashada gaadiidka**

Marka masaafada u dhexeysa guriga iyo dugsiga ay tahay

- 1 – 15 km waqtiga leexashada gaadiidka waa 35 dq + waqtiga safarka
- 15 – 30 km waqtiga leexashada gaadiidka waa 40 dq + waqtiga safarka
- 31 km iyo wixii ka dheer waqtiga leexashada gaadiidka waa 50 dq + waqtiga safarka


”Waxaa looga tegayaa qofka qaabilaya”

Caruurta gaadiidka raacda ee aan keligooda laga tegi karin marka la gaaro meesha ay ku degayaan waxaa looga tegayaa dadka meesha ku sugaya ee la xaqiijiyey aqoonsiga shakhsiyadooda (kadib markay tusaan kaadhka aqoonsiga). Dhammaan ardayda dhigata dugsiyada gaarka ah ayaa leh xaqiijinta aqoonsiga haddii aanu wax kale la sheegin marka la dalbanayey gaadiidka dugsiga.

Xaqiijinta aqoonsiga qofka wuxuu dalab waajib ah saarayaa dhammaan wadaha gaadiidka iyo dugsiga ardayda qaabilaya iyo dadka waaweyn ee guriga jooga ee ardayda ku qaabilaya gaadiidka.

Taasi waxay ka dalbeysaa wadaha gaadiidka inaanu rakaabka caruurta gaadiidka laga tegi karin keligii ayadoo aan meesha joogin qof qaabilaya oo meesha ku sugan marka gaadiidku yimaado.

Waxay taasi kala mecne tahay dugsiga qaabilaya ardayga iyo qofka weyn ee guriga jooga in xaqiijinta aqoonsiga qofka ay waajib tahay in la hubiyo inuu mar walba meesha ku sugan yahay qof si joogto ah u qaabilaya ardayda marka meesha la rabay lasoo gaaro.



Qaabilaadda firfircoon waxay la mecne tahay in qof uu si shakhsi ahaan u hor yimaado gaadiidka oo uu qaabilo caruurta rakaabka ah.

Ma ahan mas'uuliyadda wadaha baabuurka inuu raadiyo oo uu helo qofka qaabilaya caruurta.

